



PPS oo jawaab ka bixisay talo soo jeedintii Xoghayaha Gobalka ee xisaabintii 'audit' ee sanadka socotay

Hoggaamiyayaasha Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay tilmaameen dadaalka degmada ee ku aadan maamulka dhaqaale, la xisaabtanka canshuur bixiyaha iyo u sinnaanshaha natiijooyinka waxbarasho ee loogu talagalay ardayda oo idil ka dib soo saaristii Janaayo 9 la soo saaray xisaabintii 'audit' dhanka waxqabadka ee sanadka socotay. Xisaabinta 'audit' PPS iyo Waaxda Waxbarashada ee Oregon waxaa lagu sameeyay codsi laga helay Xoghayaha Gobolka Oregon.

PPS waxay soo saartay jawaab faahfaahsan oo ah 98 bog oo xisaabin ah 'audit' taasi muujisay in inta badan dib-u-habayntii lagu taliyey ay isla hadaba wadaan hoggaanka cusub ee degmadu.

"Waxaanu wax ka qabanaynaa mid kasta iyo walwal kasta oo lagaga hadlay xisaabinta 'audit'," hoggaamiyayaasha degmadu ayaa ku sheegay hadalka. "Waanu sii wadi doonaa isbeddelka socda, ee ay tilmaanta u yihiin cilmi-baari, xog iyo hababka kale ee ugu fiican si loo xaqiijiyo in aan kor u qaadayno natiijooyinka waxbarasho ee loogu talagalay ardaydeena."

Xisaabintu 'audit' waxaa laga helay qiimeyn taariikhi ah oo lagu sameeyay arrimaha PPS, iyada oo tixraac ahaan dib loogu eegay xisaabintii 1998-kii. Taasi awgeed, waxyaabo badan oo la ogaaday waxay ku saabsanaayeen arrimo "la dhaxlay" oo hoggaamiyayaasha dugsiya iyo Guddiga Waxbarashadu ay isla hadaba aqoonsadeen isla markaana wax ka qabanayaan. Waxyaabaha ay isla hadaba degmadu qaaday:

- Iyada oo la xoojiyay kor kala socoshada dhaqaalaha iyo caafimaadka, taasi oo in ay "nadiif" yihiin muujisay xisaabintii sanadlaha ahayd ee dhanka dibadda laga waday ee la dhawaan la soo saaray.
- Dugsi kasta oo laga hirgeliyay manhajka aasaasiga ah oo dhammeystiran.
- Iyada oo wax laga qabtay arrimahaasi sida isla xisaabtanta, daahfurnaanta, iyo badbaadada ardayda iyada oo la isticmaalayo wax ka bedelka siyaasadadda weyn ee Guddiga.
- Wakiilnimo dhanka sharciga oo kala duwan oo la sameeyay iyo iyada oo la baneeyay/nadiifiyay dacwadihii is-gaaray ee hore u jiray.
- Iyada oo la xoojiyay nidaamyada qandaraasyada si loogu daro qiyaaso dhanka waxqabadka iyo xoojinta daahfurnaanta iyo kor wax kala socoshada.
- Iyada oo la qiimeeyay lacagta maalgashiga ah 'equity funds' si loo xaqiijiyo in ay gaarto ardayda aadka ugu baahan.
- Iyada oo lagu daray boosas dhanka waxbarida ah si loo xaqiijiyo qiyaasaha fasalka oo macquul ah iyada oo lagu daray boosas dhanka la talinta iyo caafimaadka maskaxda ah si ardayda looga caawiyo in ay ka gudbaan caqabadaha jira si ay guul u gaaran.

- Xisaabinta 'audit', waxaa loo bilaabay codsi laga helay Xoghayaha Gobolka Bill Richardson, waxaana la sameeyay iyada oo wada shaqeyn buuxda lala leeyahay PPS.

[Akhri xisaabinta 'audit' oo buuxda](#)

[Akhri jawaabta PPS](#)